Kentucky Department of
EDUCATION

# Tusmada Kooban ee Habraaca Xalinta Khilaafaadka ee Waalidiinta Caruurta iyo Dhalinyarada (Da'aha 3 ilaa 21)

***Tusmadan ayaan loogu talo gelin inay turjunto, wax ka badesho ama badesho difaacyada habraaca ama Shuruudaha Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA) Qaybta ee sharciga federaalka iyo gobalka. Waalidiinta ayaa lagu dhiiri gelinayaa inay la xiriiraan Waaxda Waxbarashada ee Kentucky, Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah iyo Waxbarashada Caruurnimada Hore si ay u helaan xog dheeraad ah.***

*Haddii khilaaf yimaado, KDE ayaa ku talinaysa la xiriirida agaasimaha maxaliga ah ee waxbarashada gaarka ah (DoSE) kahor inta aan la tixgelin dookhyada soo socda ee xalinta khilaafaadka. Hadafka waa in waalidiinta iyo shaqaalaha dugsigu ay ka wada shaqeeyaan gaarista go'aanno ku saabsan waxbarashada ilmaha. Badanaa, xal ayaa lagu gaari karaa kulan dadban, kaas oo lagu xalin karo si ka dhakhso badan kulanka hanaanka caadiga ah ama cabashada rasmiga ah ee qoralaka ah, kaas oo gacan ka gaysanaaya ilalainta xiriirka wanaagsan. Liiska dhammaan xogta degmo dugsiyeedka maxaliga ah ayaa laga heli karaa [webseedka Kulanka Furan ee KDE] ayna ku jirto xogta xiriirka ee waaxda maxaliga ah ee DoSE.*

| Habraaca | Dhexdhexaadinta | Cabashada Rasmiga ah oo Qoraal ah | Dhagaysiga Maxkamadayn |
|---|---|---|---|
| **Isbarbar-dhiga Maxkamadaynta** | Dhexdhexaadintu waa hanaanka xalinta khilaafka oo ikhtiyaari ah aana lahayn dhibaatooyin. Kulanka waxaa fududeeya dhexdhexaadiye dhexdhexaad ah oo tababaran waxaana diirada lagu saaraa baahiyaha ardayga. Waalidiinta iyo degmada ayaa kulma kana wada shaqeeya xalinta khilaafka iyo abuurista heshiis kama danbays ah.<br><br>Ayadoo la heli karo wakhti kasta waxaa jira khilaaf gaar u ah IDEA una dhexeeya waalidiinta iyo macalimiinta oo quseeya waxbarashada gaarka ah iyo/ama adeegyada la xiriira. | Cabashada rasmiga ah ee qoran waa bayaan qoran oo ku eedaynaaya degmada dugsiga inay ku xadgudubtay shardiga sharciga gobalka ama federaalka ee waxbarashada gaarka ah.<br>Cabashada rasmiga ah ee qoraalka ah:<br>• Waa in loo gudbiyaa OSEEL sanad gudihiis marka xadgudubka laga dacwoonaayo dhacay; iyo<br>• Waxaa gudbin kara waalidka arday qaba naafo ama urur kasta ama qof kasta oo aaminsan in IDEA lagu xadgudbay.<br><br>Cabashada rasmiga ah ee qoraalka ah waa in aan lagu sheegin arimaha soo socda:<br>• Xadgudubyada xuquuqda madaniga ah ee la xiriira naafada (Qayta 504 ama arimaha muwaadiniinta Maraykanka ee Naafada ah);<br>• Sheegashada ah in ilmo lagu xadgudubay ama la dayacay; ama<br>• Arimaha hoos yimaada maamulka gaarka ah ee degmo dugsiyeedka maxaliga ah, sida shaqada macalin, layliyada macalimiinta, ama layliyadda ardayda).<br><br>Inkasta oo arimaha kor lagu sheegay ay qusayn karaan xadgudubyo ka dhan ah sharciga, cabashada rasmiga ah ee qoral ayaa keliya lagu sheegayaa xadgudubyada ka dhanka ah IDEA.<br><br>Ayadoo la heli karo markasta waxaa jira walaac gaar u ah IDEA oo quseeya ilmo gaar ah ama xadgudub saamaynaaya nidaamka guud ee carruurta. | Hanaanka khilaafka oo uu sarkaalka dhagaysigu xal ka gaaraayo khilaafaadka IDEA ee u dhexeeya waalid ama wakaalad dawladeed (tusaale, degmada dugsiga), kuwaas oo si guud loogu yeero "dhinacyada."<br><br>Dhagaysiga ayaa lagu codsan karaa arin kasta oo qusaysa:<br>• Aqoonsiga;<br>• Qiimaynta;<br>• Meelaynta waxbarashada iyo adeegyada; iyo<br>• Bixinta Waxbarashada Dadwaynaha ee Haboon ee Lacag La'aanta ah (FAPE).<br><br>Dhagaysiga hanaanka rasmiga ah waa in lagu codsadaa qaab qoraal ah waana in lasoo gudbiyaa sadex (3) sano gudahood laga bilaabo taariikhda waalidka ama degmadu ogaatay ama ay ahayd inay ogaato dhacdada.<br><br>Kahor inta aan dhagaysiga la qaban, dhinacyada waxaa laga doonayaa inay galaan Kulanka Xalinta, si degmadu ay fursad ugu hesho xalinta khilaafka keenay codsiga dhagaysiga. Kulanka ayaan la qaban doonin haddii dhinacyadu isku raacaan Dhexdhexaadin ama haddii dhinacyadu ku heshiiyaan in meesha laga saaro. |
| **Cida bilaabaysa** | Waalid ama degmo dugsiyeed ayaa codsan karta dhexdhexaadin xili kasta. Wakaaladaha qiimeynta ee gobalka ayaa sidoo kale ku talin karta tan oo noqonaysa dookh badel u ah hanaanka dacwada rasmiga ah. Labada dhinacba waa inay isku raacaan ka qaybgalka dhexdhexaadinta. | Qof kasta ama urur ayaa soo gudbin kara cabashada rasmiga ah ee qoraalka ah. | Waalid ama degmo dugsiyeed ayaa gudbin kara codsiga dhagaysiga hananaka rasmiga ah. Codsigaan waa in lagu codsadaa qaab qoraal ah waana in lasoo gudbiyaa sadex (3) sano gudahood laga bilaabo taariikhda waalidka ama degmadu ogaatay ama ay ahayd inay ogaato dhacdada. |
| **Natiijada ama Natiijada la Doonayay** | Heshiiska saxeexan, ee sharciyan lagu dhaqmaayo, ee qoran kaas oo ay isku raacayaan labada dhinac. | Go'aanka qoraal ah oo ay ku jiraan natiijooyinka iyo soo gabagabaynta, wuxuuna qorayaa sababaha go'aanka kama danbaysta ah. Waa in sidoo kale lagu daraa talaabooyinka la doonaayo si looga shaqeeyo baahiyaha ilmaha ama carruurta ee la xiriira cabashada. | Go'aanka qoraalka ah ee natiijooyinka xaqiiqada iyo xaasilka sharciga, kuwaas oo amri kara shaqooyin gaar ah oo la qabanaayo. |
| **Qaybaha Habraaca** | Doodaha dhexdhexaadintu waa qarsoodi.<br><br>Ka qaybgalayaasha ayaa ka shaqeeya xalalka si wada jir ah kadibna go'aansha natiijada.<br><br>Dhexdhexaadintu meesha kama saarto adeegsiga cabashada rasmiga ah ee qoran ama dhagaysiga hanaanka rasmiga ah. | Kani waa dookha keliya ee xalinta khilaafka ee u furan qof kasta ama urur kasta, ayna ku jiraan kuwa la xiriira ilmaha.<br><br>Go'aanka kama danbaysta ah waxaa ku jiri kara talaabooyinka sixitaanka ah kuwaas oo gaar u ah ilmaha ama la xiriira arimaha nidaamka guud. | Diiwaanka rasmiga ah ee dhagaysiga (bayaanka qoran ama elektarooniga ah) waa in la abuuraa lana siiyaa waalidka.<br><br>Go'aankaan ayaa racfaan looga qaadan karaa maxkamada gobalka ama federaalka.<br><br>Dhinaca kiiska ku guuleystay ayaa iskudayi kara inuu soo magto lacagta qareennada asagoo gudbinaaya dacwad maxkamadeed oo gaar ah. |
| **Faa'iidooyinka** | Dooduhu waa qarsoodi – waxa lagu sheego dhexdhexaadinta ayaan loo adeegsan karin cadeyn ahaan dhagaysiga dacwada ama dacwada madaniga ah.<br><br>Waxaa lagu heli karaa qaabka kale ee dookhyada badan, oo aan khilaafka badnayn kaas oo ka fudud dookhyada kale ee xalinta khilaafka.<br><br>Waxay naga caawin kartaa xal u helitaanka khilaafaadka si ka dhakhso badan dookhyada kale. | Go'aanka qoraalka ah waa in la soo saaraa ugu danbayn 60 <u>maalmood</u> kadib marka cabashada la helay ilaa in jadwalka la kordhiyo maahee.<br><br>Foomka ikhtiyaariga ah ayaa la heli karaa si uu gacan uga gaysto buuxinta cabashada. | Laga bilaabo marka cabashada la gudbiyay ilaa laga gaarayo go'aanka kama danbaysta ah, ilmaha ayaa ku jiraaya meelayntiisa hadda ee waxbarashada, ilaa in adiga iyo degmada dugsigu ku heshiisaan maahee qaab kale - tan waxaa la yiraahdaa "rahmanaan" ama "ku hayn."<br><br>Go'aanku waa mid sharciyan qasab ku ah dhinacyada.<br><br>Wakaaladaha waxbarashada ee gobalka ayaa masuul ka ah xaqiijinta in go'aanka lagu dhaqmo ilaa in racfaan laga qaato maahee. |

| Habraaca | Dhexdhexaadinta | Cabashada Rasmiga ah oo Qoraal ah | Dhagaysiga Maxkamadayn |
|---|---|---|---|
| **Tixgelinada** | Dhexdhexaadintu waa ikhtiyaari, marka waalidka iyo degmada dugsigu waa inay labaduba aqbalaan inay ka qaybgalaan.<br><br>Haddii uu jiro qaraar ku aadan arimaha ama haddii heshiis laga gaaray ayaa ku xirnaan doonta ka qaybgaleyaasha.<br><br>Xaaladaha isku dhafan ayaa u baahan kara kulannada dhexdhexaadinta oo badan si loo gaaro heshiis. Ma jirto damaanad ah in heshiis qoraal ah la abuuri doono.<br><br>Dhexdhexaadiyaasha waxaa magacawda Xafiiska Adeegyada Sharciga ee Kentucky Department of Education. | Qofka ama ururka buuxinaaya cabashada waa inuu bixiyaa xaqiiqooyin taageeraaya dhibaatooyinka ku qoran cabashadiisa.<br><br>Hanaankaan ayaan ka doonayn dadka doorka ku leh inay iskudayaan xalinta khilaafka si wada shaqeyn leh. Dhexdhexaadinta ayaa la heli kara xili kasta.<br><br>Cabtaha, waalidka ama wakaaladaha waxbarashada ee maxaliga ah (LEA) ayaa xaq u lahaan doona inuu racfaan ka qaato go'aanka qoran ee kasoo baxay cabashada una diri kara gudoomiyaha Kentucky Department of Education. Racfaan waa in lasoo gudbiyaa 15 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood kadib marka go'aanku soo baxo. LEA ayaa masuul ka ah dhaqan gelinta talaabada sixitaanka ah oo lagu qeexay Warbixinta Natiijooyinka xataa inta lagu jiro mudada sugitaanka racfaanka. | Go'aanka waxaa gaara sarkaalka dhagaysiga ama garsooraha sharciga maamulka kaas oo aan qayb ka ahayn waxbarashada ilmaha.<br><br>Go'aanku waa mid sharciyan dhaqangal ah, xataa haddii dhinac uu diido natiijada.<br><br>Haddii go'aanka racfaan laga qaato, lama dhaqan gelin karo ilaa racfaanka go'aan kama danbays ah laga gaarayo.<br><br>Degmooyinka dugsiga caadiyan waxaa matala qareeno. Haddii waalidku kireysto qareen, asaga ayaa iska dhiibaaya qarashka. |
| **Go'aan- gaaraha** | Ka qaybgalayaasha ayaa ka shaqeeya xalalka si wadajir ah waxayna xukumaan natiijada. | Wakaaladaha waxbarashada ee gobalka ayaa masuul ka ah xaqiijinta in baaritaan la sameeyo, haddii loo baahdo, go'aan ayaana laga gaaraa cabashada. | Sarkaalka dhagaysiga ama garsooraha sharciga maamulka ayaa gaaraaya go'aanka.<br><br>Gudaha Kentucky, midkood labada dhinac ayaa codsan kara racfaanka ka dhanka ah natiijada dacwada una gudbinaaya Gudiga Racfaannada ee Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba. Racaanka waa in la codsadaa 30 <u>maalmood</u> gudahood kadib go'aanka sarkaalka dhagaysiga [[707 KAR 1:340, Qaybta 13 (1)](#)]. |
| **Doorka Dhinaca Sadexaad** | <u>Dhexdhexaadiye</u> caadiyan:<br>• Wuxuu ka caawiyaa ka qaybgaleyaasha abuurista xeerarka kulanka;<br>• Wuxuu abuuraa goobta amaanka ah wuxuuna ku dhiiri geliyaa dhinacyada in midba tixgeliyo fikirka midka kale;<br>• Wuxuu hagaa dooda asagoo dhagaysanaaya, aqoonsanaaya xiiseyaasha, oo sharxaaya walaacyada;<br>• Ma gaaro go'aano; iyo<br>• Wuxuu yaqaanaa sharciyada quseeya waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira. | <u>Baaruhu</u>:<br>• Wuxuu dib u eegaa xogta la xiriirta cabashada;<br>• Wuxuu wareysan karaa ama la kulmi karaa dadka cabashadu qusayso; iyo<br>• Wuxuu gaaraa natiijooyin iyo go'aan ku dhisan sharciga quseeya. | <u>Sarkaalka dhagaysiga ama garsooraha sharciga maamulka</u>:<br>• Wuxuu kormeeraa jadwalka dhagaysiga, ayna ku jiraan dhammaan hawlaha kahor dhagaysiga;<br>• Wuxuu qabtaa dhagaysiga wuxuuna maamulaa arimaha habraaca;<br>• Wuxuu adeegsadaa sharciga quseeya si uu u qoro go'aan ku saleysan cadaynta iyo marqaati kaca lagu soo gudbiyay dhagaysiga; iyo<br>• Wuxuu iska tuuri karaa cabashada haddii arimaha xal laga gaaro kahor dhagaysiga. |
| **Wakhtiga loogu talagalay** | Waxaa la heli karaa wakhti kasta, xataa haddii codsiga dacwada cabashada/dhagaysiga ama cabashada rasmiga ah ee qoran horey loo gudbiyay.<br><br>Waa in la mudeeyaa wakhtiga ku haboon. | Sida ku cad IDEA, cabashooyinka rasmiga ah ee qoran waa in la soo gudbiyaa 1 sano gudihiis kadib taariikhda marka qofku ogaaday ama ay ahayd inuu ogaado dhibaatada.<br><br>Go'aanka qoraalka ah waa in la soo saaraa ugu danbayn 60 <u>maalmood</u> kadib marka cabashada la soo gudbiyay ilaa in jadwalka la kordhiyo maahee. | Gudaha Kentucky, dhagaysiyada cabashada waa in lagu codsadaa qaab qoraal ah waana in lasoo gudbiyaa 3 sano gudahood laga bilaabo taariikhda dhinacu ogaa ama ay ahayd inuu ogaado dhibaatada ([KRS 157.224](#)).<br><br>Go'aanka qoraalka ah waa in la soo saaraa 45 <u>maalmood</u> gudahood laga bilaabo dhammaadka mudada qaraarka ilaa in dhinac uu codsado maahee kordhinta gaarka ah ee jadwalka. |
| **Qiimaha Dhaqaale/ Cida Bixinaysa** | Lacag ugama baxayso waalidka - dhexdhexaadiyaha iyo xarumaha waxaa qarashkooda qaba dawlada. | Qarash ugama baxaayo cabtaha - baaritaanka iyo go'aanka waxaa bixinaysa qarashkooda dawlada. | Dhagaysiga, sarkaalka dhagaysiga ama garsooraha maamulka, xarumaha, iyo go'aanka waxaa lagu bixinayaa qarashka dawlada.<br><br>Dhinac kasta wuxuu dhiibayaa qarashaadkiisa, kaas oo ay ku jiri karaan qarashaadka qareennada iyo marqaatiyaasha. |
| **Saamaynta ku dhacaysa Xiriirada** | Dhexdhexaadiye ayaa ka caawin kara ka qaybgaleyaasha xalinta caqabada si hufan.<br><br>Dhexdhexaadinta guuleysata ayaa gacan ka gaysan karta xiriirada u dhexeeya dhinacyada qaybta ka ah ama kor u qaadista xiriirka qoyska iyo dugsiga. | Hanaankaan ayaan diirada saarayn xiriirada. | Hanaanka khilaafka ayaa loo arkaa mid kamid ah hanaanka xalinta khilaafaadka ee ugu colaadinta badan. |
| **Sida la Isku Diyaariyo**<br><br>***Khayraadka dheeraadka ah ayaa laga heli karaa [webseedka CADRE](#)*** | Waxaa ku caawin karta:<br>• Aqoonsiga arimaha laga doodaayo inta lagu jiro dhexdhexaadinta.<br>• Samaynta liiska baahiyaha ilmaha iyo su'aalaha aad qabto.<br>• Ka fakar su'aalaha dadka kale ay ku waydiin karaan oo qor jawaabaha aad ka bixin karto.<br>• Nidaami dukumiintiyada, ku qor taariikho iyo qoraallo, oo keen nuqullo dheeraad ah.<br>• Keen agabka ku caawin kara si aad ugu sharaxdo ama ugu wargeliso dadka kale.<br>• U diyaar garoow inaad dhagaysato aadna si taxadar leh uga fiirsato fikradaha dadka kale, iyo sidoo kale xalalka la gaari karo.<br>• Xili hore sii qorshee sida loo maareynaayo shucuurta inta lagu jiro kulanka. | Qofka cabanaya waa inuu:<br>• Waxaa ku jira macluumaad ku aadan taageerada dhibaatooyinka la aqoonsaday marka cabashada la gudbiyay.<br>• Raac shuruudaha Kentucky ee gudbinta cabasho. ([707 KAR 1:340, Qaybta 8](#))<br>• Sii degmada dugsiga nuqulka cabashada.<br>• Ka jawaab dhamaan codsiyada macluumaad dheeraadka ah ee ku saabsan cabashada wakhtiga ku haboon.<br>• Akhri jawaabta degmada dugsiga ee cabashada iyo/ haddii ay haboon tahay, bixi xog dheeraad ah si waafaqsan tilmaamaha Kentucky. | Diyaar garoow macquul ah ayaa loo baahan yahay si kiiska qaab ku filan loogu soo gudbiyo. Dhinacyadu waa in ay u diyaar garoobaan samaynta waxyaabaha soo socda ee dhagaysiga:<br>• Uruuri oo soo gudbi cadeynta.<br>• Diyaari marqaatiga, liistada maeqaatiyaasha, iyo dukumiintiyada kale ee dhagaysiga.<br>• Su'aal waydii oo wareyso marqaatiyaasha.<br><br>Dhinacyada ayaa doorta haddii ay qoranayaan ama la tashanayaan qareenka. Qof uusan matalayn qareen ayaa loogu yeeri karaa inuu u soo xaadiray asagoo ah "*pro se*." Kani waa eray laatiin ah kaas oo macnihiisu yahay qofka asagu ismatalaaya dacwada sharciga ah. |

Nuxurka kore waa tusmo aan sharci qusayn oo loo sameeyay in lala kaashado difaacyada ilaallada habraaca ee ardayda qaba naafada ee ku qoran Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA). Waxaa loogu talo galay inay noqoto tusmo dadban oo matalaysa shuruudaha xeerka iyo sharciga ee quseeya ee ku saabsan nuxurka xaqiiqooyinka la soo bandhigay mana ahan wax sharciyan qofka qabanaaya.

Waxaa laga soo xigtay CADRE (2015). CADRE *Tusmada Kooban ee Hanaannada Xainta Khilaafaadka Waxbarashada Gaarka ah ee Waalidiinta carruurta iyo Dhalinta (Da'aha 3-21)*, Eugene, Oregon, CADRE. Taariikhda Daabacaada: Janaayo 2015.